# Oggolaanshaha Ka qaybgalka Xog aruurin Waalidka ee Xanaanada

Waxaad heshay martiqaadkaan sababtoo ah waxaad haysataa ilmo ka diiwaan gashan xanaano lagu daray Xog Uruurinta Waalidka. Marka aad ka qaybqaadato Xog Uruurinta Waalidka ee Xanaanada, waxaad ogolaatay helida macluumaadkaaga xiriirka, oo ay ku jiraan magacaaga, ciwaankaaga iimaylkaaga iyo/ama lambarka taleefankaaga, iyo sidoo kale jawaabahaaga xog aruurinta.

### Waa maxay ujeedada Xog aruurin Waalidka ee Xanaanada?

Xog Uruurinta Waalidka waxay ku siinaysaa waalid ahaan fursad aad ku cabirayso ra'yigaaga ku saabsan sida aad u aragto adeegyada laga bixiyo iyo badqabka cunugaaga ee xanaanada. Natiijooyinka xog aruurinta waala kaydiyaa waxaana isticmaala xanaanada, mulkiilaha xanaanada iyo maamulka waxbarashada gobolka si loo falanqeeyo oo kor loogu qaado tayada xanaanada.

Guddiyada waxbarashada iyo tacliinta Norweey ayaa ku daabaca tirakoobyada ka soo baxay xog aruurinta bartaan oonleenka ah www.udir.no iyo www.barnehagefakta.no.

Natiijooyinka xog aruurinta waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa cilmi baaris iyo tirakoob waxaana laga yaabaa in lagu kaydiyo meel xog lagu kaydiyo. Isticmaaalida xogta waa sharci.

### Sidee loo sameeyaa Xog aruurin?

Ka jawaabista xog aruurinta waa ikhtiyaari. Sidoo kale waad ka boodi kartaa su'aalaha aadan dooneyn inaad ka jawaabto.

### Xakamaynta xogta iyo Xogaha Qarsoon

Guddiga Waxbarashada iyo Tababarka ee Norweey waa cidda masuulka ka ah Xakameynta Xogta si loo hubiyo in Xog aruurinta Waalidka ee Xanaanada loo qabto si waafaqsan sharciga ilaalinta xogta ee lagu dabaqi karo. Waxaan u isticmaali doonaa macluumaadkaaga xiriirka si aan kuugu soo dirno lifaaq iyo koodh si aan kuugu fududeyno ka qeybgalka xog aruurinta waalidka, waxaana sidoo kale kuu soo diri karnaa xasuusin ah inaad ka qeybgasho haddii aadan dhameystirin xog aruurinta. Haddii aad ka qaybqaadato xog aruurinta, waxaanu sidoo kale qori doonaa jawaabahaaga. Hawlwadeenada xogta ee wakiilada naga ah sidoo kale waxaa qabanaaya isla xeerarka.

Jawaabahaaga lalama xiriirin doono magacaaga ama lambarkaaga aqoonsiga. Guddiga waxbarashada iyo tacliinta Norweey wuxuu leeyahay habab lagu hubinaayo in natiijooyinka la xariira muunooyinka yaryar dib loo habeeyo iyo si looga hortago in la aqoonsado dadka ka jawaabaya xog aruurinta. Hase yeeshee, meesha kama saari karno in qolo saddexaad oo baaraya natiijooyinka ay samayn karaan malo-awaal ku saabsan jawaabaha ay dadka ka jawaabay xog aruurinta bixiyeen.

Mararka ay dhacdo in Guddiga Waxbarashada iyo Tababarka Norweey ay bixiyaan jawaabaha loogu talagalay cilmi-baarista, cilmi baarayaashu waa inay u hoggaansamaan shuruucda Guddiga ee la xariira isticmaalida xogta shaqsi iyo waajibaadka qarsoodiga ah, waana inay saxiixaan heshiis qarsoodi ah.

## Waad ka noqon kartaa oggolaanshahaaga

Waxaad ka noqon kartaa oggolaanshahaaga ilaa muddada xog aruurinta ay dhamaaneyso. Marka muddada xog aruurintu dhammaato, xiriirka ka dhexeeya koodhka gelitaankaaga iyo jawaabahaaga waa la tirtirayaa - marka xiriirkaan meesha laga saaro, mar dambe ma awoodi doono inaan dib u helno jawaabahaaga.  Sidoo kale, ma awoodi doono inaan baarno ama si kale u tirtirno jawaabahaaga. Dhammaan xogta xiririka waxaa la tirtiri doonaa 30 maalmood kadib taariikhda kama dambeysta ah ee hirgelinta.

## Ma qabtaa wax su'aalo ah?

Waxaad ka heli kartaa www.udir.no/undersokelser.
Sidoo kale waxaad kala xiriiri kartaa dugsiga xanaanada ama Guddiga Waxbarashada iyo Tababarka ee Noorweey iimaylkaan post@udir.no ama taleefoon markat tahay 23 30 12 00.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad dooneyso inaad isticmaasho xuquuqdaada, oo ay ku jiraan xaqa aad u leedahay inaad isticmaasho ama tirtirto xogtaada shaqsi, fadlan la xiriir Sarkaalka Ilaalinta Xogta ee Guddiga Waxbarashada iyo Tababarka ee Noorweey iimayl ahaan personvernombud@udir.no

Haddii aad dooneyso inaad gudbiso cabasho ku saabsan habaynta xogta shaqsi ee Guddiga waxbarashada iyo Tababarka, fadlan la xiriir Hay'adda Ilaalinta Xogta ee Norweey.

## Oggolaanshaha

Si aad u billoowdo xog aruurinta, guji “Accept (aqbal)”. Marka aad sidaas sameyso, sidoo kale waxaad bixineyso oggolaansho la xariira ka qaybgalka xog aruurinta.